# Mas'uul Ka Noqoshada Iyo U Maamulidda Dhaqaalaha

Guardianships and Conservatorships

## Goorma ayaa loo baahan yahay mas'uul ka noqoshada iyo u maamulidda dhaqaalaha?

Marka aanu qofku maareyn kaarin baahidooda gaarka ah, maxkamadda ayaa u magacaabi karta qof caawiya. Aanu maareyn karin waxaa loola jeedaa in qofku gabo fahamka iyo awoodda uu ku gaari karo kuna fulin karo go'aanada shaqsiga ah. Maxkamadda ayaa go'aan ka gaarta haddii u qofku gabo intaas oo dhan.

**Kow,** maxkamaddu waxa ay eegtaa in qofka uu awoodo inuu kaligii baahidiisa ka soo baxi karo iyo in kale. Baahida sidda, daryeeladda caafimaad, cuntadda, dharka, hoyga, amaanka ama uu dhaqaalihiisa maamusho.



**Labo**, haddii uusan sameyn karin waxyaabahaas kaligii qofku, ma sameyn karaa haddii la caawiyo?

Maxkamaddu sidoo kale waxa ay eegtaa in qofku uu magacaabi karo qof kale si uu ugu gaaro qofkaasi go'aamo ka caawiya ka soo bixida baahidiisa. Sidda tilmaamaha daryeeladda caafimaad ama wakiil ka noqoshadda.

Qofna markiiba looma aqoonsado inuu gabay go'aan isu gaarista haddii cudurada qaarkood ay ku dhacaan sida cudurka xusuusta qofkaka qaada, ama ay naafo noqdaan. Maxkamaddu waxa ay eegtaa waxyaabo fara badan marka ay go'aan ka gaarayaan haddii uu qofku gabay iyo in kale.

Haddii maxkamaddu ay go'aamiso inuu qof uu awood beelay, uuna u baahan yahay caawimaad ka badan kuwa labadaa waxyaabood ay siiyaan, waxa la magacaabi karaa qof noqda mas'uul ama maamule dhaqaale. Maxkamaddu waxay kaloo go'aansan kartaa inta tay tahay awooda la siinayo mas'uulka ama maamulaha dhaqaalaha. Mas'uul Ka Noqosho ama U Maamulid dhameystiran waa talaabada ugu dambeysa oo inta badan maxkamaddu tixgeliso marka aan taageerada kale ee qofka loo fidiyo aanay ku filneyn.


Mas'uuliyada ka noqoshada ama maaulida dhaqaalaha, qofka u baahan caawimaadu, ma uu waayayo xaquuqo muhiim ah markiiba. Tusaale ahaan, ma waayayo xaqqa codeynta ama xaqqa xog xafidida. Aan ka hayan in maxkamaddu ay hayso sabab fiican ayna soo saarto amar cayiman oo taa quseeya.

## Waa maxay faraqa u dhaxeeya labadooda?

- ***Mas'uul ka noqoshada*** qof u baahan caawinadda waxaa lagu magacaabaa ***qofka mas'uulka laga noqonayo***. (Waxaa horey loogu magacaabi jirey ***"mas'uulka laga yahay (ward)***" qofka caawinayana waxaa lagu magacaabaa **mas'uul**. Mas'uulka ayaa daboola baahida **qof ahaaneed** ee qofka laga noqonayo mas'uulka.

- La Maamule waxaa lagu magacaabaa ***qofka loo maamulayo hantida uu heysto***. (Qofkaas oo horey loogu yeeri jiray ***qofku sharcigu ilaaliyey "protected person"***) Qofka caawinaya waa ***u maamule***. Mas'uulka ayaa daboola baahida **maaliyadda** qofka loo maamulayo.

Mararka qaarkood, maxkamadda ayaa magacowda qof mas'uulka ka noqda **oo** hantidana u maamula. Maxkamaddu waxa ay eegtaa sida lagu caawinayo qofka mas'uulka laga noqonayo ama hantida loo maamulayo iyada oo xakameynta ugu yar qofka dusha laga saarayo.



Mas'uul ka noqoshada iyo u maamulidda hantida waa mid aad khatar u ah ujeedo wanaagsan ayaana loola jeedaa. Sharciga Minnesota waxa uu dhiirigelyaa dadku inay isku dayaan waxyaabo kale ka hor inta aysan xareysan mas'uul ka noqosha ama maamulaha dhaqaalaha. Waxyaabo ka xanibaad yar kuwaa oo ay dadku isku dayi karaan waa:

- Qoritaanka go'aan u gaarista caafimaadka. Akhri xogta urursan ee *Go'aan U Gaarista Caafimmadka*.

- Qoritaanka u wakiilashada sharciga. Akhri xogta urursan ee *Qoritaanka U Wakiilashada Sharciga Ah*.

- U wakiilasho qof u qaada lacagta lambarka bulshada, ama

- Helid maamule kiis ama hawl-wadeen si uu u caawiyo.

Qofka maxkamadda weydiisanaya mas'uul ka noqoshada waa inuu faahfaahin ka bixiyaa waxyaabaha kale ee ay isku dayeen ama aysan waxyaabaha kale u shaqeyn waayeen.

## Awoodo iyo Waajibaadyo caynee ah ayey mas'uulku ama maamulaha dhaqaalahu uu leeyahay?

- ***Qofka mas'uulka ka noqonaya*** ayaa go'aan u gaaraya qofka – Iyaga ayaa go'aan uga gaaraya waxyaabaha shaqsiga ah, sida daryeelka caafimaadka, ama halka qofku ku noolaanayo.

- ***U maamulaya hantida*** waxa awood u leeyahay arrimaha maaliyadda - waxa ay maamulaan hantida iyo lacagta qofka. Dakhligiisa ayey hayaan oo ka bixiyaan biilasha.

Mas'aaulka ama maamulaha hantida ma aha in ay jeebkooda ka bixiyaan kharashka. Waxa ay ka bixinayaan hantida ama maaliyadda qofka ay u adeegayaan. Laakiin waa in ay maxkamadda wargeliyaan - inta badan hal mar sanadkiiba - waxa ay tahay lacagta soo xarootay, sidda loo kharash gareeyey iyo sababta. Iyaga ayaa mas'uul ka noqonaya haddii ay lacagta si qaldan u maareeyaan.

Mas'uulka ama qofka maamulaya waa in uu la hadlaa qofka ay u adeegayaan oo ay raacaan sida uu doonayo ee suurogalka ah. Mas'uulka iyo qofka maamulaya hantida waa in ay ka shaqeeyaan sida ay ku jirto danta qofka ay mas'uulka ka yihiin ama hantida u maamulayaan.



Tusaale ahaan, qofka mas'uulka ah waa inuusan ogolaan daaweyn loo fidinayo qofka oo ay ogsoon yihiin in ay liddi ku tahay diinta qofku aaminsan yahay. Ma xadidi karaan xoriyadda qofka ay mas'uulka ka yihiin haddii aysan muhim u aheyn qofka oo khatar laga badbaadinayo.

## Mas'uuliyiinta iyo Maamulayaasha hantidu waa khasab inay dib war bixin u soo siiyaan maxkamadda sannad walba

Mas'uuliyiinta ama Maamuleyaasha hantidu waxa ay warbixin soo siiyaan maxkamadda iyagoo soo xareynaya warbixin sannadle ah. Waa khasab inay ka sameeyaan warbixinta sannadlaha ah khadka (online).

- Mas'uuliyiintu waa khasab inay kumbuyuutarka ku xareeyaan (e-file) warbixinta sannadlaha ah iyagoo adeegsanaya barta MyMNGuardian.

- Maamuleyaasha hantidu waa khasab inay kumbuyuutarka ku xareeyaan (e-file) warbixinta sannadlaha ah iyagoo adeegsanaya barta MyMNConservator.


Mas'uulka ama Maamulaha hantidu waxa uu codsan karaa in laga reebo shuruuda ah in khadka (online) lagu buuxiyo haddii aysan rabin inay foomamka ku buuxiyaan khadka (online). Waxa ay daabacan karaan foomam waxa ayna toos uga xareysan karaan maxkamadda barteeda ah Minnesota Judicial Branch - Get Forms | Minnesota Judicial Branch (mncourts.gov) qaybta 'Soo tabinta Foomamka' "(Reporting Forms)"

Siddoo kale waa khasab inay nuqul warbixintaa ah ay siiyaan qofka mas'uulka laga yahay ama loo maamulayo hantidiisa, iyo in sidoo kale qofkaa laga siiyo nuqul Ogaysiiska Xaquuqda.

## Waa xuquuqda qofka mas'uulka laga yahay ama hantida loo maamulayo?

Qofka laga yahay mas'uulka ama hantida loo maamulayo xuquuq sharci ah ayuu leeyahay. Waxaa laga yaabaa in ay jiraan waxyaabo xadidaya taasoo ku xiran amarka ay maxkamaddu bixiso. Laakiin guud ahaan, waxa uu qofku xaq u leeyahay:

- In loola dhaqmo si ixtiraam ku dhisan. Taas waxaa ka mid ah in la ixtiraamo habka daawada uu doonayo iyo diinta uu aamisan yahay.
- In loo fidiyo daaweynta uu u baahan yahay waqtiga uu u baahan yahay.
- Inuu maamusho waxyaabaha noloshiisu khuseeya oo maxkamaddu aysan amrin in qof kale mas'uul ka yahay.
- In ay loo magacaabo qof mas'uul ka noqda ama u maamula hantidooda.
- Waxa ay weydiisan karaan maxkamadda in ay ka guuraan halkaay degan yihiin ama qof kale laga hor istaago inuu ka raro halka uu degan yahay.
- In aad go'aan ka gaarto sida laga yeelayo hantidaada gaarka ah sida dharkaaga, qalabka guriga, gaariga. Waxa kale oo xaq u leeyihiin in ay maxkamadda weydiisan karaan in ay eegto qorshaha qofka mas'uulka ka noqonaya ama maamulaya hantidooda uu ka damacsan yahay alaabadooda qof ahaaneed.



- In qarsoodi laga dhigo macluumaadkooda.
- In ay doortaan cidda ay la hadli karaan ama booqan karaan (haddii aysan jirin sababai in booqashadaas ay khatar ku tahay nabadgelyadooda).
- Guursi. Laakiin waxaa dhici karta inay u baahdaan ansaxin maxkamadeed
- Ilmo dhalid. Qofka mas'uulka laga yahay ama hantida loo maamulayo waxa uu xaq u leeyahay inuu ogolaado ama diido in ilmaha laga joojiyo.
- Weydiiso maxkamadda in ay joojiso ama bedesho mas'uulka ka noqoshada ama u maamulidda hantida.
- In uu qareen ku matalo dhageysiga oo dhan, oo ay ka mid tahay inuu ku caawiyo oo maxkamadda weydiiyo wixii isbedel ah.
- Cadeyn karto.
- In aad qori karto dardaaran caafimaad ama aad cid u wakiilan karto, aan ka ahayn in maxkamaddi tiraa ma uu sameyn karo. Akhri xogta urursan ee *Go'aan U Gaarista Caafimmadka*.

## Goorma ayaa loo sameeyaa mas'uul ka noqoshada iyo u maamulidda dhaqaalaha?




Qofka ayaa soo gudbiya codsi (lagu magacaabo arji) oo maxkamadda weydiista inuu u magacaabo inuu mas'uul ka noqdo ama u maamulo hantida qof kale oo u baahan yahay in la caawiyo. Qofka caawinaadda u baahan waa in la wargeliyaa arjiga maxkamadda loo soo qoray. Qofka caawinaadda u baahan waxa uu xoq u leeyahay in uu qareen qabsado. Haddii aanu qareen qabsan karin, maxkamadda ayaa amri karta in degmadu bixiso oo u qabato.

Qofka soo gudbinaya codsiga waa inuu soo bandhigaa "si cad oo maxkamaddu ku qanacdo" in loo baahan yahay mas'uul ka noqosho ama u maamulidda hanti. taasi way adag tahay haddii qofka u baahan aanu ogoleyn. Haddii maxkamaddu ogolaato mas'uul ka noqoshada ama u maamulidda, amarka maxkamadda ayaa lagu caddeeyaa ilaalinta xuquuqda qofka mas'uulka laga noqonayo ama hantida loo maamulayo. Amarkaasi waxa uu qofka mas'uulka noqonaya ama hantida u maamulaya waxay ay leeyihiin awood buuxda, laakiin waxaa suurogal ah in meelaha qaarkood uu sharcigu xadidayo.

Waxaa jira foomam aad maxkamadda weydiisan karto si aad u codsato in aad mas'uul ka noqoto ama aad hantida u maamusho qof u baahan in la caawiyo.

Soo booqo www.mncourts.gov.




→ Guji *Get Forms* (*La Soo Bax Foomamka*)
→ Guji *Guardianship/Conservatorship* *(Mas'uul Ka Noqoshada/ U Maamulidda Hantida)*

## Yaa loo magacaabi karaa noqon kara mas'uul ama u maamule?

Maxkamadda ayaa go'aan ka gaarta cidda loo magacaabayo mas'uul ka noqoshada ama maamulidda hantida. Maxkamaddu waxa ay dooran kartaa:

- Qof mas'uul ka noqda oo horey u caawinayey qofka mas'uulka laga noqonayo kuna sugan gobolkan ama gobol kale
- Wakiil horey loogu magacaabay dardaaranka caafimaadka ama wakiil ka noqoshada
- Sayga ama xaaska ama qof kale oo dardaaranka lagu sheegay
- Ilmo weyn oo qofku dhalay
- Waalidka qofka, ama
- qof ay shaqadiisu tahay inuu noqodo sidii mas'uul ama u maamule hanti xirfadle ah oo kale.

Inta badan, xanaano-bixiye lacag qaata sidda daryeel caafimaad-bixiyeyaasha ama shaqaalaha guryaha dadka lagu hayo looma magacaabi karo inay noqdaan mas'uul sharciyeysan ama hanti maamule.



Haddii loo baahdo in 2 qof loo magacaabo mas'uulka sharci ah ama hanti maamule, kolkaa waxaa dhici karta maxkamaddu inay magacowdo 2 qof oo wadajir u ah mas'uulka sharciyeysan iyo 2 qof wadajir u ah hanti maamuleyaal. Tusaale ahaan, kolka tani ay dhici karaa waa marka ay jiraan 2 ruux oo waaweyn oo qofka waayeelka ahi uu dhalay.

## Qofka mas'uulka laga yahay ama hantidiida loo maamulo maxkamadda dib ma ugu noqon karaa haddii ay dareemaan in qofka mas'uulka ka ah ama hantida u maamulaya uusan ugu adeegeyn sida ay dantoodu ku jirto?

Haa. Qofka mas'uulka ah ama maamulaya hantida waxa markasta la soconaya maxkamadda, iyada oo qofka mas'uulka laga yahay ama hantida loo maamulayo uu maxkamadda weydiisan karo in ay sameeyaan waxyaabo kala oo ka duwan.

Qofka mas'uulka laga yahay ama hantida loo maamulo waxa uu xaq u leeyahay in qareen loo qabto dhageysiga maxkamadda ee mas'uulka noqoshada ama u maamulidda hantida. Qofku waxa uu la xiriiri karaa qareenka ay maxkamaddu u qabatay Haddii uu garanayo. Waxa kale oo qofku la xiriiri karaa ama waraaq u kori karaa maxkamadda oo weydiisan karaa in dhageysi loo qabto ama loo qabto qareen caawiya.




## Mala joojin karaa mas'uul ka noqoshada ama u maamulidda hantida?

Haa. Maxkamadda ayaa joojin karta mas'uul ka noqoshada ama u maamulidda hantida haddii qofka mas'uulka laga yahay ama hantida loo maamulayo uu muujiyo inuusan u baahneyn caawinaad ama badbaadin. Inta badan, dhaqtar, hawl-wadeen bulsho ama dabiibe ayaa loo baahdaa in uu makhraati ku furo in qofka mas'uulka laga noqonayaa uu arrimihiisa isagu maamulan karo. Haddii ay maxkamaddu ogolaato, kor kala socoshada maxkamaddu way dhamaaneysaa qofka mas'uulka laga yahay ama hantidiisa loo maamulo isaga ayaa go'aan isu gaaraya.

## Macluumaad Dheeraad ah

Macluumaad dheeraad ah, waxa aad ka heleysaa Fiidiyoowga Mas'uul Ka Noqoshada Ama U Maamulidda Hantida ee maxkamadda Gobolka Minnesota ee www.mncourts.gov



→ Guji *Help Topics* *(Mowduucyada Caawinaadda)*
→ Guji *Conservatorship* *(U Maamulidda Hantida)* ama guji *Mas'uul Ka Noqoshada*
→ Botonka ay ku taal Overview,guji Fiidiyoowga *Guardianship/Conservatorship Video* *(Mas'uul Ka Noqoshada/ U Maamulidda Hantida)*

Waxa kale oo Bogga Maxkamadda Gobolka Minnesota ka heleysaa Buuga Mas'uul Ka Noqoshada Iyo U Maamulidda Hantida. Waxa uu ku jiraa halka uu fiidyoowga ku jiro dushiisa laakiin hoos timaadda botonka *Rules, Laws & Resources*.

## Go'aan Gaarida la Gargaaro

Hay'ada Volunteers of America waxa ay leedahay mashruuc ka shaqeeya inuu yareeyo mas'uul ka noqoshada iyo maamulida dhaqaalaha uuna ku bedelo iyaga waxa la yiraa "go'aan gaarida la gargaaro." Arrintani waa mid kale oo la yeeli karo oo leh xadidaadyo yar siina karta qofka awood badan oo uu sameeyo waxa uu dooranayo iyo go'aamadiisa. Wixii kale ee akhbaar dheeraad ah gal shabakada: https://www.voamnwi.org/center-excellence-supported-decision-making.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**